

## حقوق الوالدين وذوي الأرحام

### Xuquuqda ay leeyihiin waalidiinta iyo qaraabada

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah kaasoo oo kitaabkiisa kariimka ah ku yiri:

(وَقَضَىٰ رَبُّكَ أَلَّا تَعْبُدُوا إِلَّا إِيَّاهُ وَبِالْوَالِدَيْنِ إِحْسَانًا إِمَّا يَبُلُغَنَّ عِنْدَكَ الْكِبَرَ أَحَدُهُمَا أَوْ كِلَاهُمَا فَلَا تَقُلْ لَهُمَا أَفًّا وَلَا تَنْهَرُهُمَا وَقُلْ لَهُمَا قَوْلًا كَرِيمًا \*  
وَاخْفِضْ لَهُمَا جَنَاحَ الذَّلِّ مِنَ الرَّحْمَةِ وَقُلْ رَبِّ ارْحَمْهُمَا كَمَا رَبَّيْتَنِي صَغِيرًا)

(Wuxuu faray rabbigaaga inaydaan caabudin isaga mooyee iyo inaad u samo fashaan labada waalid samo falid, hadduu ku gaaro agtaada wayni midkood ama labaduba ha ku dhihin uf, hana canaan una dheh hadal fiican),

Waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago.

Waxaan qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa.

Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa.

#### Intaas kaddib:

Islaamka wuxuu la yimid dhanbaal sahlan oo ugu yeeraya dabci kastoo wanaagsan, wuxuuna gaarsiinayaa mabda' kaste oo fiican, wuxuuna ku hanuuninayaa

dhaqan kastoo toosan, wuxuuna ka dhigayaa qiyamka iyo tusaalooyinka sarsare manhaj nololeed, wuxuuna u toosinayaa miisaanka wada dhaqanka oo dadka ka dhexeeya si xaq ah iyo cadaalad iyo naxariis iyo jacayl iyo dadnimo, wuxuu leeyahay Alle subxaanahu:

{إِنَّ اللَّهَ يَأْمُرُ بِالْعَدْلِ وَالْإِحْسَانِ وَإِيتَاءِ ذِي الْقُرْبَىٰ وَيَنْهَىٰ عَنِ الْفَحْشَاءِ وَالْمُنْكَرِ وَالْبَغْيِ يَعِظُكُمْ لَعَلَّكُمْ تَذَكَّرُونَ}

(Alle wuxuu fari caddaalad iyo samafal iyo waxsiinta qaraabada wuxuuna reebi xumaan iyo munkar iyo gardarro, wuuna idin waanin inaad wax xasuusataan)

Muuqaallada weynida shareecada Islaamka waxaa ka mid ah inay u dejisay qaacidooyin iyo xuquuq la dhaqanka waalidiinta iyo qaraabada, labada waalid waa kuwa ugu xaqnimo badan tixgelinta, iyo qaddarinta iyo daryeelka Alle wuxuu nagu amray kitabkiisa kariimka inaan baarri u noqono labada waalid iyo inaan wanaag u sameyno, wuxuu kumiyay Alle arrinkaas iyo waajibnimada cibaadadiisa iyo inaan wax lala wadaajinin wuxuu yiri:

{وَاعْبُدُوا اللَّهَ وَلَا تُشْرِكُوا بِهِ شَيْئًا وَبِالْوَالِدَيْنِ إِحْسَانًا}

(Caabuda Alle hana la wadaajinina waxba, labada waalidna u wanaag fala).

Sidoo kale Alle subxaanahu wuxuu amray in lagu shukriyo nimcooyinkiisa, wuxuu ku xiray in lagu shukriyo labada waalid shukrigiisa, weynida fadligooda awgii iyo qiimahooda sare iyo weynida darajadooda, wuxuu yiri sayidkeena Cabdullaahi bin Cabbaas -Ilaahay raalli haka noqdee -: "seddex aayad waxay soo degeen iyagoo ku xiran seddex, lama aqbabalyo mid iyadoon wadanin waxa ku xiran, waxaa ka mid ah Alle oraahdiisa:

{أَنْ أَشْكُرَ لِي وَلِوَالِدَيْكَ}

**(Ee igu mahadi ani iyo labadaadii waalid)**

Qofkii ku shukriyo Alle oo aan ku shukrinin labadiisa waalid lagama aqbalayo.

Islaamka wuxuu kor u qaaday waalidiinta, wuxuuna amray in baarri loo noqdo, si wanaagsanna lagula dhaqmo loona naxariisto, waxaa laga wariyay Cabdullaahi bin Camar -Ilaahay raalli haka noqdee - wuxuu yiri: Nin ayaa u yimid nabiga oo jihaadka idin kaga dalbanayo, wuxuu ku yiri rasuulka - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -:

(أَحْيِ وَالِدَاكَ؟ قَالَ: نَعَمْ قَالَ: فِيهِمَا فَجَاهِدْ)

**(Ma nool yihiin labadaada waalid? wuxuu yiri: haa, wuxuu ku yiri: iyaga ku jihaad)**

Labadii gabdhood uu dhalay ninka suubaanaa ee qisadii nabi Muuse - nabadgelyo korkiisa ha haatee - waxay sameeyeen tusaalaha ugu fiican ee baarrinimada iyo daryeelka wanaagsan, aabbahooda wuxuu ahaa

oday weyn oo aan awoodin shaqo, iyaga ayaa qabanayay shaqadiisa iyagoon dhibsanin, wuxuu yiri Alle:

{وَلَمَّا وَرَدَ مَاءَ مَدْيَنَ وَجَدَ عَلَيْهِ أُمَّةً مِّنَ النَّاسِ يَسْقُونَ وَوَجَدَ مِنْ دُونِهِمْ  
امْرَأَتَيْنِ تَذُودَانِ قَالَ مَا خَطْبُكُمَا قَالَتَا لَا نَسْقِي حَتَّى يُصَدَرَ الرَّعَاءُ وَأَبُونَا  
شَيْخٌ كَبِيرٌ }

(Markuu gaaray biyaha Madyan wuxuu ka helay ummad dad ahoo waraabinaysa wuxuuna ka helay sokodooda labo haween oo reebi (xoolahooda) wuxuuna yiri muxuu xaalkiinu yahay, waxayna dheheen ma waraabinno intay ka fulaan xoolajirku, Aabbaheenana waa oday weyn)

Waxaa laga wariyay Jaabir -Ilaahay raalli haka noqdee - nin inuu yiri: rasuulkii allow waxaan leeyahay hanti iyo carruur aabbahaygana wuxuu rabaa inuu hantida iga dhameeyo, wuxuu yiri rasuulka:

(أَنْتَ وَمَالُكَ لِأَيِّكَ)

(Adiga iyo hantidaadaba aabbahaaga ayaa idin leh).

Waxaa ku dayasho wanaagsan noogu sugan sayida Faatima -Ilaahay raalli haka noqdee - sidey u jeclaan jirtay ayuu tixgalin jirtay aabbheeda rasuulkii Alle, markuu usoo galo fadhiga ayay ka kici jirtay, way dhunkan jirtay, waxay fariisin jirtay booskeeda iyadoo ay ka tahay naxariis iyo farxad ay ku faraxsan tahay imaanshihiisa iyo qaddarintiisa.

Sidoo kale Islaamka wuxuu na amray weynaynta labada waalid iyo inaan la dhibin wuxuu yiri:

{إِمَّا يَبْلُغَنَّ عِنْدَكَ الْكِبَرَ أَحَدُهُمَا أَوْ كِلَاهُمَا فَلَا تَقُلْ لَهُمَا أُفٍّ وَلَا تَنْهَرْهُمَا وَقُلْ لَهُمَا قَوْلًا كَرِيمًا}

(Hadduu ku gaaro agtaada wayni midkood ama labaduba ha ku dhihin uf, hana canaanana una dheh hadal fiican).

Wuxuu ka reebay Alle qofka ereyga ugu yar oo dhibsasho tilmaamaya, hadduu jiri lahaa erey ka yar ereyga "uf" wuu reebi lahaa Alle, waxaa laga rabaa qofka inuusan sabab u noqonin dhibkooda ama xumeyntooda si kaste ahaato, wuxuu ku yiri sayidkeena Abuu Hurayra -Ilaahay raalli haka noqdee - nin - asoo ku waaninaya baarri inuu u noqdo aabbihiisa: "aabbahaaga hortiiisa ha soconin, hortiiisana ha fariisanin magaciisana ha ugu yeerin cayna ha usoo jiidin", kuma habboona inuu dhib usoo jiido waalidiintiisa, wuxuu leeyahay nabigeena:

(إِنَّ مِنَ أَكْبَرِ الْكِبَائِرِ أَنْ يَلْعَنَ الرَّجُلُ وَالِدَيْهِ) ، قالوا : يا رسول الله ، وكيف يلعن الرجل أبويه؟ قال : (يسبُّ الرجلُ الرجلَ ، فيسبُّ أباه ، ويسبُّ الرجلُ أمه ، فيسبُّ أمه)

(Waxaa ka mid ah dambiyada waaweyn inuu ninka lacnado labadiisa waalid) waxay dhaheen: rasuulkii allow siduu u lacnadaa ninka labadiisa waalid? wuxuu yiri: (wuxuu caynayaa ninka ninka kale marka wuxuu

**caynayaa aabbihiisa ninkana wuxuu caynayaa hooyadiisa marka wuxuu caynayaa hooyadiisa)**

Islaamka wuxuu ku dardaarmay baarri in loo noqdo labada waalid wanaagna lagula dhaqmo xataa hadday diin kale haystaan, wuxuu leeyahay Alle subxaanahu:

{وَإِنْ جَاهِدَاكَ عَلَىٰ أَنْ تُشْرِكَ بِي مَا لَيْسَ لَكَ بِهِ عِلْمٌ فَلَا تُطِعْهُمَا  
وَصَاحِبُهُمَا فِي الدُّنْيَا مَعْرُوفًا}

(Hadday kugula dadaalaan (Labada waalid) inaad ii shariig yeesho waxaadan aqoon u lahayn ha ku adeecin kulana noolow adduunka si fiican).

Sidan ayaa ka sugnaatay nabi Ibraahim - nabadgelyo korkiisa ha haatee - markuu aabbihiisa ugu yeerayay diinta, wuxuu leeyahay Alle subxaanahu:

{وَأذْكَرُ فِي الْكِتَابِ إِبْرَاهِيمَ إِنَّهُ كَانَ صَدِيقًا نَبِيًّا \* إِذْ قَالَ لِأَبِيهِ يَا أَبَتِ لِمَ تَعْبُدُ مَا لَا يَسْمَعُ وَلَا يُبْصِرُ وَلَا يُغْنِي عَنْكَ شَيْئًا \* يَا أَبَتِ إِنِّي قَدْ جَاءَنِي مِنَ الْعِلْمِ مَا لَمْ يَأْتِكَ فَاتَّبِعْنِي أَهْدِكَ صِرَاطًا سَوِيًّا \* يَا أَبَتِ لَا تَعْبُدِ الشَّيْطَانَ إِنَّ الشَّيْطَانَ كَانَ لِلرَّحْمَنِ عَصِيًّا \* يَا أَبَتِ إِنِّي أَخَافُ أَنْ يَمَسَّكَ عَذَابٌ مِنَ الرَّحْمَنِ فَتَكُونَ لِلشَّيْطَانِ وَلِيًّا}

(Ku sheeg kitaabka (nabi) Ibraahim, wuxuu ahaa runbadane nabi ah \* markuu ku yiri aabihiis aabbow maxaad u caabudi waxaan maqlayn waxna arkayn kaana deeqayn waxba \* aabbow aniga waxaa ii yimid cilmi waxaan adi kuu imaanin ee i raac aan kugu hanuuniyo jid toosane (xaqa) \* aabbow ha caabudin shaydaan, shaydaanku wuxuu u yahay Allaha raxmaanka ah caasi \* aabbow anigu waxaan ka cabsan

**inuu ku taabto cadaabka Allaha Raxmaanka ah ood u noqoto shaydaan sokeeye).**

Waa tanaa Asmaa bint Abiibakr -Ilaahay raalli haka noqdee - waxaa u timid hooyadeeda - iyadoo mushrikad ah - oo u baahan, waxay weyddiisay nabiga arrinkaas waxay tiri: rasuulkii allow hooyadayda ayaa ii timid iyadoo ii baahan ma xiriirinayaa? wuxuu yiri:

(نَعَمْ ، صِلِي أُمَّكَ)

**(Haa, xiriiri hooyadaada)**

Baarrinimada waalidiinta waxay leedahay saameys iyo faa'idooyin waaweyn iyo fadli badan addoonka uu guranayo adduun iyo aakhiraba, waxaa ka mid ah:

birulwaalideenka wuxuu sabab u yahay raalliga Alle, wuxuu noo sheegay nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - in seddex qofood roob uu ku qasbay inay god ku yaalla buur hoosteeda galaan, waxaa kusoo dhacay dhagax weyn gudka afkiisa, wuu ku xiray, waxay dhaheen: idinkama badbaadinayo dhagaxan inaad Alle ku baryidaan mooyee camalkiina suuban, wuxuu yiri nin iyaga ka mid ah: Ilaahayow waxaa ii joogay labo waalid oo duq ah iyo ilmo yaryar, waan daryeeli jiray, markaan usoo laabto waan usoo lisi jiray, waxaan marka hore waarbin jiray labadayda waalid ilmahayga kahor, maalin ayaan kasoo daahay waxaan imid fiidkii, waxaan arkay iyagoo hurday, waan usoo

lisay saan ugu soo lisi jiray madaxooda ayaan ag istaagay waxaan nacayay inaan soo toosiyo iyo inaan ilmaha waraabiyo, ilmahana gaajo ayay la qaylinayeen cagahayga agtooda ilaa fajarka kasoo baxo, Ilaahayow haddaad og tahay inaan u sameeyay dartaada naga feyd waxa aan ku jirno meel aan cirka ka arki karno, Ilaahay wuu ka feyday cirka ayay arkeen..." baarrinimada uu waalidkiisa u sameeyay ayaa sabab u ahaa in laga qaado kurabada iyo inuu badbaado.

Waxaa ka mid ah qofkii baarri u noqda labadiisa waalid ilmihisa ayaa baarri u noqonaya, maxaayeelay abaalka wuxuu la mid yahay falka, Ilaahay wuxuu ka abaalmaryay nabi Ibrahiim - nabadgelyo korkiisa ha haatee - markuu aabbihiisa kula dhaqmay dabci wanaagsan uuna u sameeyay baarrinimo wuxuu ku arsaaqay wiilkiisa Ismaaciil - nabadgelyo korkiisa ha haatee -, wuxuu sheegay qura'aanka kariimka arrinkaas markuu ka hadlayay qaababka ugu wanaagsan daacada iyo baarrinimada, wuxuu yiri Alle:

{فَلَمَّا بَلَغَ مَعَهُ السَّعْيَ قَالَ يَا بُنَيَّ إِنِّي أَرَى فِي الْمَنَامِ أَنِّي أَذْبَحُكَ فَانظُرْ  
مَاذَا تَرَى قَالَ يَا أَبَتِ افْعَلْ مَا تُؤْمَرُ سَتَجِدُنِي إِنْ شَاءَ اللَّهُ مِنَ الصَّابِرِينَ }

(Markuu ku gaaray agtiisa socod wuxuu ku yiri Nabi Ibraahim wiilkayow waxaan ku arkay hurdada anoo ku gawrici ee eeg waxaad fali, wuxuuna yiri aabbow

**samee waxa lagu faray waxaad heli hadduu Alle doono inaan ka mid noqdo kuwa samree).**

Sidoo kale birulwaalideenka wuxuu ku leeyahay mirio aduunka, sidoo kale waa sabab muslinka inuu ku liibaano aakhirro galidda jannada, nin ayaa u yimid rasuulka asoo jihaad idin kaga dalbanayo wuxuu yiri rasuulka:

(هَلْ لَكَ مِنْ أُمَّ؟) ، قال : نعم ، قال (صلى الله عليه وسلم) :  
(فَالزَّمَّهَا ، فَإِنَّ الْجَنَّةَ عِنْدَ رَجُلِهَا)

**(Hooyo ma leedahay?) wuxuu yiri: haa wuxuu yiri: (ag joog jannada lugteeda ayay ag taallaa).**

Wuxuu yiri rasuulka:

(الوالدُ أَوْسَطُ أَبْوَابِ الْجَنَّةِ ، فَإِنْ شئتَ فحافظ على الباب أو ضيِّعْ)  
**(Waalikda waa albaabada jannada midka dhexe haddii aad rabto ilaalso alabaabka ama iska dacay).**

Ibnu Cumar -Ilaahay raalli haka noqdee - ayaa ku yiri nin: maka baqdaa naarta? ma jeceshay inaad jannada gasho? wuxuu yiri: haa wuxuu yiri: ma nool yihiin labadaada waalid? wuxuu yiri: hooyadayda ayaa joogto wuxuu yiri: wallaahi haddaad hadalka u jilciso ood cunto siiso jannada ayaad galaysaa intaad ka fogaanayso dambiyada waaweyn.

Waxaan adkaynaynaa qofka si kaste uu wax u siinayo labadiisa waalid wanaag iyo baarrinimo ma gudi karo xaqqooda, mana u celin karo wanaagooda, wuxuu leeyahay nabigeena:

(لَا يَجْزِي وُلْدٌ وَالِدًا ، إِلَّا أَنْ يَجِدَهُ مَمْلُوكًا فَيَشْتَرِيَهُ فَيُعْتِقَهُ)

(Wiil aabbihiisa abaal uma gudi karo hadduu helo mooyee asoo addoon ah marka uu gato uuna xoreeyo).

**Waxaan oranayaa oraahdayda oo tan ah, Ilaahay ayaan dambidhaaf u weydiinayaa nafteyda iyo idinka**  
\*\*\*

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah, waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago.

Waxaan qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa

Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa dhammaan.

**Walaalaha islaamka ahow:**

Siduu islaamka uga dardaarmay labada waalid ayuu qaraabadana uga dardaarmay, waa dadka qofka qaraabo ay ka dhexeyso, wuxuu u yeelay xuquuq, wuxuu yiri Alle:

{وَأُولُو الْأَرْحَامِ بَعْضُهُمْ أَوْلَىٰ بِبَعْضٍ فِي كِتَابِ اللَّهِ}

(Qaraabadaana qaarkood qaar ku mudan yahay xukunka Alle)

Wuxuu yiri rasuulka:

{إِنَّ اللَّهَ تَعَالَىٰ خَلَقَ الْخَلْقَ ، حَتَّىٰ إِذَا فَرَغَ مِنْهُمْ ، قَامَتِ الرَّحِمُ ، فَقَالَتْ : هَذَا مَقَامُ الْعَائِدِ بِكَ مِنَ الْقَطِيعَةِ ، قَالَ : نَعَمْ ، أَمَا تَرْضَيْنَ أَنْ أَصِلَ مَنْ وَصَلَكَ ، وَأَقْطَعَ مَنْ قَطَعَكَ؟ قَالَتْ : بَلَىٰ ، قَالَ : فَذَلِكَ لَكَ ، ثُمَّ قَالَ رَسُولُ اللَّهِ (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) : (اقْرَأُوا إِنَّ شَيْئَكُمْ : {فَهَلْ عَسَيْتُمْ إِنْ تَوَلَّيْتُمْ أَنْ تُفْسِدُوا فِي الْأَرْضِ وَتَقَطَّعُوا أَرْحَامَكُمْ \* أُولَئِكَ الَّذِينَ لَعَنَهُمُ اللَّهُ فَأَصَمَّهُمْ وَأَعَمَّى أَبْصَارَهُمْ})

(Ilaahay wuxuu abuuray khalqiga marka uu dhammeeyay waxaa istaagtay qaraabada waxay tiri: kan waa booska qof kaa magangalaya goysmada wuxuu yiri: haa sow raalli kuma tihid inaan xiriiriyo qofkii ku xiriiriyo inaan gooyo qofkii ku gooyo? waxay tiri: haa wuxuu yiri: taas waad leedahay) kaddib wuxuu yiri rasuulka: (akhriya haddaad doontaan: (Amaad mudan tihiin haddaad jeedsataan inaad fasaadisaan dhulka, qaraabadiinana aad goysaan \* kuwaasi waa kuwa Alle lacnaday, dhagaha iyo indhahana tiray \* miyayna Quraanka fiirfiirinin mise quluubtooda ayaa qufulo saaran).

Wuxuu yiri rasuulka:

(قَالَ اللَّهُ (تَبَارَكَ وَتَعَالَى) : أَنَا اللَّهُ ، وَأَنَا الرَّحْمَنُ ، خَلَقْتُ الرَّحِمَ ،  
وَشَقَقْتُ لَهَا مِنْ اسْمِي ، فَمَنْ وَصَلَهَا وَصَلْتُهُ ، وَمَنْ قَطَعَهَا بَتَّئْتُهُ)

(Alle tabaaraka watacaalaa wuxuu yiri: **Anigaa Alle ah anigaa naxariisbadne ah qaraabada ayaan abuuray, magacayga ayaan kasoo faliiqay qofkii xiriiriyo waan xiriirinayaa qofkii gooyana waan jarayaa).**

Xiriirinta qaraabada waa in la booqdaa, xaalkoodana la ogaa loona kaalmeeyaa, wuxuu yiri rasuulka:

(الصَّدَقَةُ عَلَى الْمِسْكِينِ صَدَقَةٌ ، وَعَلَى ذِي الرَّحِمِ اثْنَتَانِ؛ صَلَةٌ ،  
وَصَدَقَةٌ)

(In lagu sadaqaysto miskiinka waa sadaqo midka qaraabada ahna waa labo: sadaqo iyo xiirin)

Sidoo kale waa in la ajiibaa dacwadooda, waa in la booqaa bukaankooda, waa in la raaca janaasadooda, sidoo kale waxaa habboon in la weyneeyo midkooda weyn loona naxariisto kooda yar, niyaddana loo fiicneeyo loona duceeyo.

Ilaahay wuxuu ka dhigay xiriirinta qaraabada sabab barakeynaya cimriga arsaaqdana waasicinaya, wuxuu

leeyahay rasuulka - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -:

(مَنْ أَحَبَّ أَنْ يُمَدَّ لَهُ فِي عُمُرِهِ ، وَأَنْ يُزَادَ لَهُ فِي رِزْقِهِ ، فَلْيَبِرَّ وَالِدَيْهِ ،  
وَلْيَصِلْ رَحِمَهُ)

**(Qofkii rabo in loo badiyo cimrigiisa loona siyaadiyo arsaaqdiisa baarri ha u noqdo labadiisa waalid hana xiriiriyo qaraabadiisa).**

Sidoo kale wuxuu sheegay nabiga inay tahay xiriirinta qaraabada sabab dambiyada lagu dhaafo, waxaa u yimid rasuulka nin wuxuu yiri: rasuulkii allow waxaan ku dhacay dambi weyn ee towbad ma leeyahay? wuxuu yiri rasuulka:

(هَلْ لَكَ مِنْ أُمَّ؟) ، قَالَ : لَا ، قَالَ (صلى الله عليه وسلم) : (هَلْ لَكَ مِنْ خَالَةٍ؟) ، قَالَ : نَعَمْ ، قَالَ (صلى الله عليه وسلم) : (فَبِرَّهَا)

**(Hooyo ma leedahay? wuxuu yiri: maya wuxuu yiri rasuulka: habaryar ma leedahay? wuxuu yiri: haa wuxuu yiri rasuulka: (baari u noqo).**

Waxaa waajib ku ah qofka inuu iska jiro qaraabogosyka xumaanna inuusan ku celinin xumaan, bal inuu iska cafiyo iskana saamaxo, wuxuu yiri rasuulka:

(لَيْسَ الْوَاصِلُ بِالْمُكَافِي ، وَلَكِنَّ الْوَاصِلُ الَّذِي إِذَا قُطِعَتْ رَحْمَتُهُ  
وَصَلَّاهَا). وجاء رجل إلى رسول الله (صلى الله عليه وسلم) فقال : يَا  
رَسُولَ اللَّهِ ، إِنَّ لِي قَرَابَةً أَصْلُهُمْ وَيَقْطَعُونِي ، وَأُحْسِنُ إِلَيْهِمْ وَيُسَيِّئُونَ  
إِلَيَّ ، وَأَحْلُمُ عَنْهُمْ وَيَجْهَلُونَ عَلَيَّ ، فَقَالَ : (لَئِنْ كُنْتَ كَمَا قُلْتَ ،  
فَكَأَنَّمَا تُسْفَهُمُ الْمَلَّ ، وَلَا يَزَالُ مَعَكَ مِنَ اللَّهِ ظَهِيرٌ عَلَيْهِمْ مَا دُمْتَ عَلَيَّ  
ذَلِكَ)

(ma aha xiriiriyaha kan abalgudaya, laakin xiriiriyaha waa kan marka qaraabaiisa ay goyso xiriiriya, waxaa u yimid nabiga nin wuxuu yiri: rasuulkii allow, qaraabo ayaan leeyahay, waan xiriiriyaay way i goynayaan, wanaag baan u sameeyaa xumaan ayay igu sameeyaan, waan u dulqaataa way igu xadgudbaan, wuxuu yiri rasuulka: **(haddii aad tahay sidaad sheegeyso waa aidgoo cunsiinaya dambas kulul, Ilaahay xaggiisana waxaa kaaga suganaanayo gargaare maadaama sidaas aad tahay).**

Islaamka wuxuu reebay qaraabogosyka, wuxuuna ka digay ciribta xun laga helo adduun iyo aakhiraba, wuxuu leeyahay rasuulka:

(مَا مِنْ ذَنْبٍ أَحْرَى أَنْ يُعَجَّلَ اللَّهُ الْعُقُوبَةَ لِصَاحِبِهِ فِي الدُّنْيَا ، مَعَ مَا  
يَدَّخِرُ لَهُ فِي الْآخِرَةِ ، مِنَ الْبُغْيِ ، وَقَطِيعَةِ الرَّحِمِ)

(Dambi ma jiro oo ku habboon in Ilaahay ciqaab qofka ugu soo dedejiyo adduunka asoona aakhiru ugu keedinayo gardarrada iyo qaraabagoyska)

Wuxuu leeyahaya rasuulka:

(لَا يَدْخُلُ الْجَنَّةَ قَاطِعٌ) ؛ يعني : قاطع رحم

(Ma galo jannada gooye) waxaa laga wadaa kan qaraabada gooya.

Ilaahay aan kaga baqno aabbayaasheena iyo hooyooyinkeena aan xiriirino qaraabadeena dadka oo dhanna aan wanaag u sameyno

**Ilaahayow na waafaji inaan baarri u noqono aabbayaasheena iyo hooyooyinkeena, naga dhig kuwa qaraabada xiriiriya noo ilaali shacabkeena, masarteenana ka dhig dal amaan ah oo bashbash iyo barwaaqo iyo nabad iyo dhammaan dalalka caalamka**